Somali

Macluumaadka Dadweynaha

Diiwaanka Barnaamijka Talaalka Qaranka ee HPV
(The National HPV Vaccination Program Register)

Waa maxay Barnaamijka Talaalka Qaranka ee HPV?
Barnaamijka Talaalka The National Human Papillomavirus (HPV) wuxuu bilawday Juulay 2007. Barnaamijka waxaa kharajkiisa bixiyey Dawlada Australia. Barnaamijku wuxuu siiyaa talaalka HPV oo lacag la'aana dumarka xaqa u leh si looga xafido sababta keenta kansarka gala ilma-galeenka afkiisa. Talaalka waxaa lagu bixiyaa lacag la'aan:

- Gabdhaha 12 iyo 13ka sano jira dugsiga ayay joogto ugu qaadan doonaan
- Gabdhaha jira 13–18 sanadood ee dugsiyada (ilaa 30^{ka} Juun 2009)
- Dumarka 18–26 sandood jira (ilaa 30^{ka} Juun 2009).

Talaalku wuxuu noqonayaa saddex irbadood, badanaa waxaa lagu siiyaa muddo 6 bilood ah.

Waa maxay Diiwaanka HPV (HPV Register)?
Diiwaanka Barnaamijka Talaalka Qaranka ee HPV (HPV Register) waa qarsoodi wuxuuna ururiyaa faahfaahinta ku saabsan talaalka HPV ee laga bixiyey Australia.

Maxaan anniga (ama gabadhaydu) u gelaynaa Diiwaanka HPV?
Waxaa ku jirta saddex faaiido inaad ku qoran tahay Diiwaanka HPV.

i) Shahaadada Dhamaystirka
Marka Diiwaanka HPV loo sheego in adiga (ama gabadhaadu) qaadateen dhamaan saddexda irbadood, waxaa laguu soo diri doonaa shahaadada dhamaystirka diiwaankaaga.

ii) Is-xasuusin
Diiwaanka HPV wuxuu kuu soo diri doonaa qoraal kuu sheegi doona haddii adiga ama gabadhaadu aad gafteen qadar talaala oo dugsiga ku salaysan ee Barnaamijka Talaalka HPV.

iii) wargelin mustaqbil oo ku saabsan xoojiyayaasha
Cilmi baarista hadda ahi waxay muujisay in loo baahan yahay qadaro talaal ah oo xoojiyayaal ah. Si kasta ha ahaatee, haddii la socodka waxtarka mustaqbilka ee talaalka HPV muujiyo in loo baahan yahay xoojiyayaal, Diiwaanku wuxuu isticmaalayaa macluumaadka uu hayo si laguula xiriiro oo laguu siiyo talada ku haboon.

Waa maxay faaiidada kale ee Diiwaanka HPV?
Faaiidadad aad adiga (ama gabadhaadu) ka sokow, ka qaybgalka Diwaanka HPV wuxuu caawimaya in dawladu la socoto sida Barnaamijka Talaalka HPV u shaqaynayo una cabirayo saamayntu barnaamijku ku leeyahay kansarka ilma-galeenka afkiisa.

Somali

Macluumaad kee lagu haynayaa Diiwaanka HPV?
Macluumaadka la ururiyey laguna kaydiyey Diiwaanka HPV oo adiga kugu saabsan (ama gabadhaada) waxaa ka mid ah:

- magaca, taariikhda dhalashada, cinwaanka, asalka qofka, iyo nambarka Medicare-ka qof qaatay talaalka
- magaca iyo cinwaanka waalidka ama masuulka (haddii loo baahan yahay)
- faahfaahinta qadar talaaleed kasta
- magaca iyo meesha dhakhtarku hawsha ku qabtay ama kalkaalisada bixisay talaalka.

Sidee macluumaadka ku ururin doonaa Diiwaanka HPV?
Macluumaad ku saabsan talaalka HPV-ga lagu bixiyo dugsiyada waxaa bixin doona dawladaha gobolada iyo Territoriska waxayna siinayaan Diiwaanka HPV taas oo qayb ka ah barnaamijka talaalka. Macluumaadka ku saabsan talaalada la siiyo bulshada waxaa la siin doonaa Diiwaanka HPV waxaana siinaya mihnadlayaasha caafimaadka bixiya talaalka.

Diiwaangelinta talaalkayga (ama talaalka gabadhaydu) ma in uu aado baa Diiwaanka HPV?
Macluumaadka waxaa lagu siin doonaa Diiwaanka iyadoo ogolaanshaha laga haysto shakhsiga ama masuulka. Haddii aadan doonayn faahfaahintaan in loo diro Diiwaanka waa inaad muujisaa waqtiga talaalka. Waad kala bixi kartaa macluumaadkaaga waqtigaad qorayso Diiwaanka.

Yaa arkaya macluumaadkayga?
Macluumaadka lagu kaydiyo Diiwaanka HPV wuxuu ahaanayaa qarsoodi barayfasiga qof walbana waa la xafidi doonaa. Kuwa bixiya talaalka waxaa laga yaabaa inay u edman yihiin inay arkaan shakhsiga faahfaahintiisa haddii loogu baahan yahay ujeedooyin daryeel caafimaad.

Macluumaad aan la carab-baabin (taasi waa, macluumaad aan magacaabayn adiga ama gabadhaada) ayaa laga yaabaa in la siiyo Dawlada Australia tan goboleedka, Territorigaba iyo cilmibaarayaasha si looga sameeyo qorshe ama ujeedo cilmi baariseed iyadoo leh ansixinta ku haboon. Qofna ma awoodi doono inuu carab-baabo shakhsiyaadka macluumaadka uu Diiwaanku u bixiyey ujeedadaan.

Mustaqbilka, macluumaadka talaalka iyo kan shakhsiyeed oo lagu hayo Diiwaanka Barnaamijka Talaalka HPV ee Qaranka waxaa lala xiriirin doonaa macluumaadka ka yimid baaritaanka Pap smear iyo diiwaanada kansarka ilma-galeenka afkiisa oo ay hadda hayso Dawladu si loola socdo wax ku oolnimada talaalka xagga ka hortegida kansarka ilma-galeenka afkiisa.

Somali

Sidee ula xiriiraa Diiwaanka HPV?
Waxaad wici kartaa Xarunta Xiriirka HPV Register 1800 478 734 (inta u dhexaysa 8fiidkii ilaa 6da maqribkii Isniinta ilaa Jimcaha, iyo 9subaxii ilaa 2da duhurkii Sabtida Australia oo dhan). Fadlan u sheeg hagaha telefoonada haddii aad u baahan tahay caawimaad tarjumaad.

Macluumaad intaas ka badan iyo xiriirin la xiriirta

- National HPV Vaccination Program (Barnaamijka Taalalka HPV ee Qaranka http://www.health.gov.au/internet/standby/publishing.nsf/Content/general-practitioners
- Immunise Australia Program (Barnaamijka Talaal Australia) http://www.immunise.health.gov.au/
- National Cervical Screening Program (Barnaamijka Qaranka ee Baarida Ilmagaleenka afkiisa) http://www.cancerscreening.gov.au/internet/screening/publishing.nsf/Content/cervical-1lp